

## **Wargelino muhiim ah oo khuseeya Waalidiinta Carruurta aan dugsiga weli gaarin**

- Waalidku waa ilmaha macallinkiisa ugu horreeya ee ugu fiican.
- La samee ilmahaaga waxyaabo la mid ah kuwa ku yaala baalka waalidka ee *u diyaargaree ilmahaaga dugsiga* ee ka mid ah xirmadda Ku soo dhawoow Dugsiga Xanaanada Carruurta.
- La hadal oo dhagayso ilmahaaga marka uu ciyaarayo oo waxyaabo isla sameeya.
- Dhiiri geli oo ammaan ilmahaaga. Waxay ka caawinaysaa in uu barto xirfado cusub.
- Ilmahaaga kula hadal oo wax ugu akhri luqaddaada kowaad (afkaaga hooyo).
- Macluumaadka ku jira xirmada la yiraahdo Ku soo dhawoow Dugsiga Xanaanada Carruurta waxaa loogu talagalay waalidka iyo ilmahooda in ay wada isticmaalaan.

Qoysaska isticmaala macluumaadka ku jira xirmada la yiraahdo Ku soo dhawoow Dugsiga Xanaanada Carruurta, waxay ka caawinaysaa carruurtooda in ay bartaan xirfadahan hoos ku yaala oo muhiim u ah ku-guulaysiga waxbarashada.

- Maqalka
- Hadalka
- Wadaagga ama wax-wada qaybsiga
- Horumarka ereyada
- Fahamka tilmaanta meelaha
- Bilawga xirfadaha akhriska
- Barashada xuruufta
- Fahamka tirooyinka fudud iyo xisaabta
- U-bogidda sheekooyinka iyo buugaagta
- Xoojinta gacanta iyo farta si ay wax u qabtaan ama u jaraan
- Wax sawiridda iyo koolaynta (xabagayn)
- Bilawga xirfadaha qorista
- Fikradaha firfircoon
- Go'aan gaariista
- Kalsoonida